

Mowduuca	Siyaasadda Bixinta Biilasha iyo Soo Aruurinta (Self-Pay Billing & Collection Policy)
Nambarka Aqoonsiga	RevCycl-1055
Qeybta	Wareegga Dakhliga
Qeybta hoose	Maamulka Wareegga Dakhliga (Revenue Cycle Admin)
Qeybta	Waaxda
Xariirka	Shannon Carey
Baddalaaddii Ugu Dambaysay	3/12/2024

TIXRAACYADA

GL – 2555 Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy)
GL – 3001 EMTALA: Aruurinta Macluumaadka Maaliyadda
29 CFR §§ 1.501(r)-4, 5, iyo 6
Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Guidelines)
Sharciga Badbaadinta Bukaanka iyo Daryeelka la Awoodo (Patient Protection and Affordable Care Act) (ACA)
Bogga dambe 1

LAGU DABAQI KARO TO

Dhamaan bukaanka Siistemka Caafimaadka Lutheran Gundersen (Gundersen Lutheran Health System, Inc.) (halkaana, dhamaan lagu magacaabo "GHS") ee qaata adeegyada daryeelka caafimaadka laga qaato Xarunta Caafimaadka Lutheran Gundersen (Gundersen Lutheran Medical Center, Inc.) ama Gundersen Kliinik (Gundersen Clinic Ltd).

G

Ujeedada Siistemka Caafimaadka Gundersen (Gundersen Health System) waxay tahay in aan isa soocno, heer sare gaarsiino daryeelka bukaanka, adeegsano aqoon, cilmi baaris iyo anagoo hagaajino caafimaadka bulshadaha aan u adeegno. Aragtideeda waxay tahay in la xoojiyo caafimaadka iyo fiyoobida bulshadaha, isla markaasna kobcineyno naf kasta aan taabano, kana mid ah bukaanka, qoysaska, iyo shaqaalaha.

Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Soo Aruurinta (GHS Self-Pay Billing and Collection Policy) waa waafaqsan tahay himiladeeda iyo waxa ay qiimeyso. Waxaa loogu talagalay in lala kulmo sharuudaha dhamaan sharciyada lagu dabaqi kara sida sharciyada federaalka, gobolka, iyo kuwa deegaanka, kana mid ah xad la'aan, qeybta 1.501(r) Xeerka Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service Code) ee 1986, sida loo baddalay, iyo qaanuunka hoos yimaada, iyo Sharciga Federaalka Daryeelka Badbaadinta Bukaanka iyo Sharciga Daryeelka la Awoodo (Federal Patient Protection and Affordable Care Act) (ACA).

Si GHS ay si mas'uul ah u maamusho ilaheeda maaliyadda iyadoo isla markaasna bukaanka ku taageereyso maaliyadda ay u baahan yahiiin, bukaanka waxaa la filaa in ay wax ku biiriyaan kharashka daryeelkooda taasoo ku saleysan awoodda uu qofka u leeyahay in uu bixiyo iyo/ama sharuudaha ceymiskooda. Biilashaan Qofka Iska Bixiyo iyo Siyaasadda Aruurinta (Self-Pay Billing and Collection Policy) iyo Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) waxay ahaan doonaan aasaaska dhaqanka aruurinta GHS ee la xariira xisaabta bukaanka. Siyaasaddaan waxay sharaxdaa habka GHS ku xalliso waajibaadka lacag bixinta bukaanka, waxay ogeysiisaa bukaanka siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS (Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda).

Sida waafaqsan siyaasaddaan, bukaanka, ama damaanad qaadaha bukaanka lagama qaadi doono talaabo, hase ahaatee marka hore waa in la qaado dadaal macquul ah si loo ogaado haddii bukaanka ama damaanad qaadaha uu xaq u leeyahay kaalmo sida hoos timaado Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy) (Financial Assistance Policy).

Bukaanka la siiyay daryeelka degdegga ama daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waxaa la siin doonaa fursad ay ku dalbadaan kaalmada maaliyadda taasoo waafaqsan ACA iyo sharciyadooda fullinta. GHS ma samayn doonta takoor ku saleysan da', jinsi, isir, caqiido, midab, diin, itaal darri, rabitaanka jinsiga, asal qaran, ama xaaladda socdaalka marka ay go'aan ka gaareyso kaalmada maaliyadda. Siyaasaddaan waxay la xariirtaa kharashka la xariira adeegyada daryeelka caafimaadka ee laga bixiyo Xarunta Daweynta Lutheran Gundersen (Gundersen Lutheran Medical Center), Inc. iyo/ama Kliinikada Gundersen (Gundersen Clinic)

FULLINTA

SIFEYNTA: Sifeynta soo socoto waxaa lagu dabaqi karaa dhamaan qeybaha siyaasaddaan.

Muddada arjiga: Muddo 120 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka ruqsadda ka dambeeyo.

Deynta Xun Waajibka saaran bukaanka doorto in uu iska bixiyo kharashka balse aan la bixinin in ka badan 120 maalin kaddib marka GHS go'aan ka gaartay mas'uuliyadda maaliyadda kaddibna bukaanka ana damaanad qaadaha bukaanka u soo dirto bayaanka biilka kowaad kaddib marka bukaanka ka baxo isbitaalka, ama aan waafaqsaneen qorshaha lacag bixinta lagu heshiyay.

Kaalmada Daryeelka Musiibada (Catastrophic Care Assistance): Kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka xaqa u yeesha marka dakhliga soo gala qoyska sannadkii ka badan yahay 400% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level); iyo hanti ka yar xisaabta 600% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level); iyo waajibka maaliyadda ka dhasha adeegyada daweynta ay bixiso GHS oo ka badan 25% dakhliga guud ee sannad kasta soo galay qoyska.

Kaalmada Daryeelka la Dhimay Kaalmada maaliyadda ee laga helo dhimista - taasoo ku saleysan miisaan - loogu talagalay bukaanka xaqa u yeesha, ama damaanad qaadaha, sannadkiiba dakhliga guud ee soo gala qoyska u dhexeeyo 200-400% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level).

Talaabada Aruurinta Aan Caadiga Ahayn (Extraordinary Collection Action) (ECA): Talaabo kasta oo laga qaado qof mas'uul ka ah biil lagu leeyahay lana xariira adeeg ay bixisay GHS oo u baahan habka sharciga ama maxkamadda ama soo sheegidda macluumaad ka soo horjeeda damaanad qaadaha oo loo gudbiyo wakaaladaha ka warbixiya deynta uu qabo macaamilka ama xafiisyada deynta (credit bureau). ECAYada kama mid ah bukaanka ama damaanad qaadaha oo loo diro biil, bukaanka oo telefoon loo diro lana weydiiyo su'aalo macquul ah, ama xisaabta oo lagu wareejiyo dhinac kale si looga soo aruuriyo sida waafaqsan sharuudaha 29 CFR 1.501(r)-6(b)(2) iyo iyadoo aan la isticmaalin habka sharciga ama maxkamadda.

Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Guidelines): Wuxuu sannad kasta ku soo baxaa Diiwaanka Federaalka (Federal Register) waxaana soo saara Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Department of Health and Human Services) (HHS)

Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) (FPL) Heerka Saboolnimada Federaalka Federal Poverty Level (FPL) waxay adeegsataa heerarka dakhliga ee ku kala duwan xagga tirada iyo dhismaha qoyska ee ku sugan saboolnimada Mareykanka. Waxaa laga casriyeyaa Diiwaanka Federaalka (Federal Register) muddo ka muddo, waxaana casriyeyaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (United States Department of Health and Human Services) sida waafaqsan awoodda qeybta hoose (2) ee Qeybta 9902, Cutubka 42 ee Xeerka Mareykanka (United States Code). Tilmaamaha FPL ee iminka jira waxaa laga tixraaci karaa <http://aspe.hhs.gov/POVERTY/>.

Kaalmada Maaliyadda: Kaalmada la siiyo bukaanka xaq u yeesha ama qofka (dadka) mas'uulka ka ah, oo haddii aan la kaalmeynin la kilma dhibaato xagga fmaaliyadda, in laga qaado dhamaan ama qeyb waajibka ka saaran maaliyadda xagga xaaladaha degdegga ama daryeelka caafimaad ahaa lagama maarmaanka ah ay GHS bixiso.

Daryeelka Lacag La'aanta ah: Ka dhaafid 100% waajibka saaran maaliyadda bukaanka lana xariira adeegyada caafimaadka xaqa loo leeyahay ayna bixiso GHS lana siiyo bukaanka xaqa u yeesha, ama damaanad qaadeyaasha, ay guud ahaan qoyska sannadkii soo gasho in la'eg ama ka hooseyso 200% Heerka SaboioInimada Federaalka (Federal Poverty Level).

Damaanad Qaadaha: Qofka, marka laga reebo bukaanka, ee mas'uulka ka ah bixinta biilka bukaanka.

Iskudarka Eedeynta: Iskudarka kharashka la soo dallaco xisaabta loo dajiyay bixinta adeegyada daryeelka bukaanka ka hor inta aan laga goynin dakhliga.

Soo Koobidda Luqadda Fudud: Oraah qoran oo soo koobta Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) oo loo soo qoray si fashiix ah, si cad ah, oo kooban taasoo loola jeedo in lagu hubiyo in akhristaha uu dhakhso iyo si dhamaystiran u fahmo sida suurtoogalka ah.

Qorshaha Lacag Bixinta: Qorshaha lacag ay ku heshiyeen GHS iyo bukaanka labadaba, ama damaanad qaadaha bukaanka, xagga khidmadaha laga bixiyo jeebka. Qorshaha lacag bixinta wuxuu tixgelin doonaa daruufaha maaliyadda bukaanka, xisaabta uu qabo, iyo lacago horay loo bixiyay haddii ay jiraan.

Xisabaadka Qofka Iska Bixiyo ama Mas'uuliyadda Maaliyadda Saaran Qofka Iska Bixiyo: Xisabaadka bukaanka, ama damaanad qaadeyaasha bukaanka, ay waajib ku tahay in ay toos u siiyaan GHS. Waxaa ka mid ah baaqiga leyska rabo kaddib marka la bixiyo sheegashooyinka ceymiska, xisaabta laga rabo bukaanka aan ceymiska lahayn, ama baaqiga leyska rabo kaddib marka leysku celceliyo xisaabta sida waafaqsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy).

Dhimista aan Ceymis la Gelinin: Dhimista ay heli karaan bukaanka ama damaanad qaadeyaasha aan qaabin ceymiska dhinac saddaxaad. Dhimista qofka aan ceymis ku jirin waxay la'eg tahay xisaabta guud ahaan la soo dallaco (AGB).

GO'AAMINTA XISAABTA

GHS waxay ballan qaaday in ay kaalmada maaliyadda siiso bukaanka xaqa u yeesha, ama damaanad qaadeyaasha bukaanka, kuwa aan haysanin ceymis ama haysta ceymis liita kuwaasoo dhibaato kala kulma in ay bixiyaan kharashka daryeelka adeegyada la ogol yahay ee laga qaato GHS. Lacag bixinta waa laga sii wadi doonaa bukaanka lagu tilmaamay in ay awood u leeyahiin adeegga. Hababka aruurinta ee ku qoran siyaasaddaan waxaa lagu dabaqi doonaa dhamaan bukaanka iyadoo aan la fiirin xaaladda ceymiska, waana in ay hoggaansanto sharciyada lagu dabaqi karo iyo himilada GHS.

GHS waxay si waadix ah ula xariiri doontaa bukaanka, ama damaanad qaadeyaasha bukaanka, xagga helitaanka brograamyada kaalmada maaliyadda, iyo sidoo kale lacag bixinta la filaayo. Tani waxaa la samayn doonaa inta uu socdo wareegga dakhliga.

Waa siyaasadda GHS in la mamnuuco in lacag bixin lagu xero xaaladaha caafimaadka degdegga ka hor inta bukaanka aan la siinin adeegyada ama ogolaashada hawlaha soo aruurinta ee faragelin karaa bixinta daryeelka caafimaadka degdegga (fiiri siyaasadda GL-3001).

Dhamaan macluumaadka maaliyadda laga helo bukaanka, damaanad qaadeyaashooda, waxay ahaan doonaan qarsoodi.

Xaqiijinta Mas'uuliyadda Maaliyadda Saaran Bukaanka: GHS waxay qaadi doontaa talaabo macquul ah si loo sharciyeyo waajibaadka lacag bixinta bukaanka. Talaabo ayaa la qaadi doonaa si loo aqoonsado lacag bixiyeyaasha ka soo jeeda dhinac saddaxaad si bukaanka loogu kaalmeyo in xal laga garo biilashooda, GHS waxay lacag bixin ka raadsan doontaa dhamaan lacag bixiyeyaasha ka soo jeeda dhinac saddaxaad si ay bukaanka ugu kaalmeyaan xal ka gaarisys biilashooda. Waxaa la raaci doonaa habka soo gudbinta sheegashada bixiyaha dhinaca-saddaxaad waqtiga la qabtay ee ku habboon si loo hubsado go'aanka laga gaaro sheegashada haboon. Haddii loo baahdo ayna tahay lagama maarmaan, GHS waxay la shaqeyn doontaa bukaanka si ay ugu kaalmeyso iyaga in xal laga gaaro arrimaha la xariira bixinta sheegashada ceymiska.

Meel Saaridda Baaqiga ku Haray Bukaanka: Kaddib marka la ogaado mas'uuliyadda maaliyadda qofka iska bixiya ee saaran bukaanka ama damaanad qaadaha bukaanka, GHS waxay (i) ogeysiin doontaa bukaanka, damaanad qaadaha bukaanka, fursadaha u furan ee lagu xalliyo baaqiga, iyo (ii) waxay siin doontaa siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance), Arjiga Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application), Soo Koobida ku Qoran Luqadda Fudud (Plain Language Summary), iyo Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Siyaasadda Soo Aruurinta (Self-Pay Billing and Collection Policy). Haddii bukaanka ama damaanad qaadaha uusan awoodin in uu bixiyo baaqiga laga rabo muddo labaatan iyo kow (21) maalin, waxaa loo sheegi doonaa fursadaha kale ee jira si loo xalliyo baaqiga haray uu qofka iska bixiyo, kana mid ah qorshaha lacag bixinta, iyo/ama kaalmada maaliyadda. Dadaal macquul ah ayaa la samayn doonaa si loo ogeysiiyo bukaanka, ama damaanad qaadeyaasha siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS, waxaana la siin doonaa macluumaad ku saabsan sida loo soo gudbiyo arjiga kaalmada maaliyadda.

Bayaanada: GHS waxay soo diri doontaa ugu yaraan saddax (3) bayaan oo ku saabsan soo aruurinta xisabaadka qofka iska bixiyo lagu soo diro boostada ama email cinwaanka ugu dambeyay bukaan kasta ama damaanad qaade kasta. Hase ahaatee, looma baahna bayaano dheeraad ah kaddib marka damaanad qaadaha soo gudbiyo arji buuxa oo lagu dalbado kaalmada maaliyadda sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda ama si buudo u bixiyo. Waa waajib saaran damaanad qaadaha in uu bixiyo cinwaan sax ah oo loogu soo diro warqadaha waqtiga la bixiyo adeegga ama marka uu guuro. Haddii xisaabta aysan lahayn cinwaan sax ah, waxaa go'aan laga gaari doonaa waxa loola jeedo dadaalka macquulka ah. Dhamaan bayaanada uu qofka iska bixiyo waxaa ka mid noqon doono, balse kuma eka;

1. Dallacaadda adeegyada noocaas;
2. Xisaabta loo baahan yahay in uu bixiyo bukaanka ama cidda qaaday damaanadda;
3. Ogeysiis qoran oo la arki karo oo ogeysiiya iyo la socodsiiya bukaanka ama damaanad qaadaha sida loo heli karo kaalmada maaliyadda sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda kana mid ah nambarka telefoonka waaxda iyo cinwaanka bogga internetka halkaas oo laga heli karo koobiyada warqadaha, kana mid ah Arjiga Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application),
4. Ugu yaraan mid ka mid ah bayaanada boostada lagu soo diray ama lagu soo diray email waxaa ku jira ogeysiis qoran oo ogeysiiya bukaanka ama damaanad qaadaha in ay jiraan ECAYo lagu dhaqaaqi karo haddii bukaanka ama damaanad qaadaha aysan dalbanin kaalmada maaliyadda hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda ama aysan bixinin xisaabta leyska rabo ugu damabayn waqtiga loo qabtay. Soo koobidda luqad la fahmi karo marka ugu horeyso ee siyaasadda kaalmada maaliyadda ayaa la soo raacin doonaa bayaankaan.

Kaalmada Maaliyadda: Bukaanka iyo xubnaha bulsahada ay GHS u adeegto Macluumaadka kaalmada maaliyadda waxaa loo. Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy), Arjiga Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application), iyo Soo Koobidda Luqadda Fuddud (Plain Language Summary) ee Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) waxaa laga heli doonaa bogga internetka siistemka GHS. Waxaad heli kartaa koobiyada warqadda macluumaadka marka aad codsatid, waa lacag la'aan.

Macluumaadka kaalmada maaliyadda, kana mid ah macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy) iyo tilmaamaha ku saabsan sida loola xariiro GHS loona helo kaalmo, waxaa la siin doonaa bukaanka marka la soo dhaweeyo ama marka la fasaxo. Waxaa kaloo la heli karaa macluumaadka ku saabsan macluumaadka kaalmada maaliyadda, oo lacag la'aan ah, marka uu soo codsado bukaanka kaddibna waxaa lagu dhajin doonaa meel laga arki karo gudaha goobaha diiwaan gelinta iyo goobaha seexinta isbitaalka iyo kliinikada, gudaha waaxda degdegga isbitaalka, iyo waxaa kaloo la soo raacin doonaa bayaanada bukaanka bil kasta.

Qorshaha Lacag Bixinta: Bukaanka ama kuwa ka damaanad waxaa kaloo macluumaad laga siin doonaa qorshooyinka lacag bixinta. Bukaanka aan bixin karin baaqiga laga rabo muddo labaatan iyo kow (21) maalin gudahooda, lana saarin kor socod, waxaa dhici karto in loo dheereeyo qorshaha lacag bixinta ilaa 36 bil ama saddax (3) sanno. Isku toosinta qorshoyinkaas lacag bixinta waa in lala gaaraa Adeegga Maaliyadda Macaamilka GHS (GHS Customer Financial Service). Haddii bukaanka, ama damaanad qaadaha bukaanka, uusan dalbanin qorshaha lacag bixinta ama haddii bukaanka, ama

damaanad qaadaha bukaanka, ku guuldareysto in uu u hoggaansamo qorshaha lacag bixinta, waxaa dhici karto xisaabta lagu wareejiyo wakaalad dibadda ka jirta oo ku hawlan aruurinta.

Haddii bukaanka ama damaanad qaadaha GHS ee haysta qorshaha lacag bixinta kaddibna adeegyo laga siiyo GHS, galo kharash dheeraad ah ee la xariira baaqiga qofka laga rabo, waxaa dhici karto in wax laga baddalo qorshaha lacag bixinta iminka jirta ee bukaanka ama damaanad qaadaha bukaanka.

Qorshooyinka lacag bixinta waxaa heli kara bukaanka, ama damaanad qaadeyaashooda, ee xaq u yeesha in ka yar 100% kaalmada maaliyadda, balso aan awoodin in ay iska bixiyaan baaqiga oo buuxa. Qorshahaan lacag bixinta waxay hoos imaan doontaa isla sharciyada lagu dabaqi karo bukaanka ama damaanad qaadeyaasha aan xaq u lahayn kaalmada maaliyadda.

Qilaafka Biilasha: GHS waxay bukaanka ogeysiin doontaa habka ay su'aal ku weydiin karaan ama ay ku qilaafi karaan biilasha. Qilaafka waxaa loo jeedin doonaa Waaxada Adeegyada Maaliyadda Maccaamilka ee GHS (GHS's Customer Financial Services Department) Magaca waaxda, Adeegyada Maaliyada Maccaamilka (Customer Financial Services), iyo nambarka telefoonka lacag la'aanta ee loo diro qilaafka waxaa bil kasta lagu soo qori doonaa dhamaan bayaanada bukaanka iyo ogeysiisyada soo aruurinta GHS. Adeegyada Maaliyadda Maccaamilka (Customer Financial Services) waxay ka jawaabi doontaa su'aalaha ay soo weydiyaan bukaanka muddo 30 maalin la shaqeeyo gudahooda kaddib marka la soo gaarsiiyo murranka. Si loo xalliyo qilaafka u baahan baaritaan dheeraad ah, dhamaan falalka aruurinta waxaa la joojin doonaa ilaa go'aan kama dhambays ah laga gaar xisaabta leysku haysto.

TALAABADAH A RUURINTA AAN CAADIGA AHAYN EE LA QAADO MARKA AAN LA BIXIN KHARASHKA

Talaabadaha Aruurinta Deynta Xun: Lama ogola in xisaab laga qaado talaabadaha deynta xun, ama ECA, muddo 120 maalin gudahooda laga bilaabo bayaanka ka dambeeyo ka bisidda kliinikada ka hor inta GHS aysan sameynin dadaal macquul ah si loo ogaado haddii bukaankaas uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Waa la soo gaabin karaa waqtiga 120-maalin haddii go'aan laga gaaro kaalmada maaliyadda, la dajiyo qorshaha lacag bixinta kuna heshiyaan bukaanka ama damaanad qaadaha, iyo bukaanka ama damaanad qaadaha aysan u hoggaansamin qorshaha lacag bixinta. Lama ogola in talaabo ka soo aruurin lagu qaado bukaan haddii bukaanka ama damaanad qaadaha, bixiyo warqado muujiyo in isaga ama iyada dalbatay ceymis hoos yimaada Medicaid, ama brograamyada kale caafimaadka ay dadweynaha mas'uul ka yahiiin, lagana yaabo in laga bixiyo kharashka sheegashada laga rabo, welina aan la ogolaanin xaq u yeelashada.

Ka hor intaan xisaabta bukaanka loo dirin wakaaladda aruurinta, GHS waxay si macquul ah ugu dadaali doontaa in ay bixiso macluumaad ku saabsan kaalmada maaliyadda kaddibna waxay bukaanka ama damaanad qaadaha boostada ugu soo diri doontaa ugu yaraan saddax (3) bayaan qoran. Bayaan kasta waxaa ku jiri doono ogeysiis la arki karo oo ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda GHS, nambarka telefoonka loo baahan yahay in la waco si loo helo kaalmo, iyo cinwaanka toos ugu dhaca bogga internetka. Haddii dhamaan dadaalka lagula xariiro bukaanka, ama damaanad qaadaha, aan lagu guuleysanin, isla markaasna aan la haynin cinwaan sax ah oo la geeyo warqadaha, xisabaadka waxaa loo diri doonaa wakaaladda soo aruurinta,

Muddo 240 maalin laga bilaabo bayaanka kowaad, haddii bukaanka ama damaanad qaadaha, soo dalbado kaalmada maaliyadda, waa la qaban doonaa arjiga, kaddibna waxaa halkaas ku dhamaada talaabada aruurinta, inta laga gaaraayo go'aanka xaq u yeelashada. Haddii arjiilaha loo soo ogolaado Daryeel Lacag La'aan ah (Free Care), lama qaadi doono talaabo kale oo kharashka looga soo aruuriyo xisaabta. Haddii arjiilaha loo diido aalmada maaliyadda ama loo ogolaado daryeel la dhimay, waxaa la qaadi doonaa talabooyin oo lagu xalliyo waajibka harray. Haddii xisaabta aan xal laga gaarin ama aan la samaynin qorshe lagu xalliyo xisaabta, waxaa lagu dhaqaaqi doonaan talabooyin aruurin oo dheeraad ah.

Haddii qofka soo gudbiyo arji aan dhamaystirneen muddada arjiga, GHS waa (i) in ay joojiso dhamaan talabooyinka soo aruurinta, (ii) siiso qofka ogeysiis qoran oo sharaxa macluumaadka dheeraadka ah iyo/ama warqadaha la rabo sida hoos timaado Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) ama foomka arjiga ee loo baahan yahay in la gudbiyo si loo dhamaystiro arjiga Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) kaddibna (iii) macluumaadka lagala xariiro GHS. Argiga wuxuu ahaan doonaa mid shaqeyyo muddo soddon (30) maalin laga bilaabo taariikhda warqadda loo soo dirray arjiilaha soo codsaday macluumaadka. Haddii arjiilaha uusan ku soo jawaabin muddada 30ka maalin gudahooda, waa la soo diidi doonaa arjiga.

Arjiileyaasha loo ogolaado kaalmada maaliyadda waxaa loo soo celin doonaa lacagaha dheeraadka uu qabo bukaanka ama damaanad qaadaha xagga xisabaadka lagu siiyay kaalmada deeqda sida hoos timaada Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance Policy). Lacag celinta waxay quseysaa lacagaha ka badan \$5.00 ama ka badan. Sida waafaqsan siyaasaddaan, guud ahaan, kaalmada maaliyadda kama mid aha lacagaha lagu daro ama baaqiga haray kaddib marka shirkadda ceymiska ay bixisay haddii bukaanka ku guuldareysto in uu helo tixraacyada ku habboon ama ogolaasho, ama haddii kaalmada noocaas aysan waafaqsaneen heshiiska lala galay ceymiska, sidaas darteedna, lacag bixinta noocaas ee la qabtay lama soo celin doono.

GHS waxay isticmaali kartaa talaabadaha aruurinta marka ay lacag bixin ka rabto bukaanka ama damaanad qaadeyaasha (i) aan bixinin baaqiga muddo 120 maalin kuwaasoo aan dalbanin kaalmada maaliyadda, (ii) bukaanka ama damaanad qaadeyaasha aan la soconin qorshaha lacag bixinta lagu heshiyay, ama (iii) bukaanka ama damaanad qaadeyaasha aan weli si daacad ah ula shaqeynin in ay iska bixiyaan baaqiga haray.

Ugu yaraan 30 maalin ka hor inta aysan bilaabin hal ama ka badan ECAYada si ay u hesho lacagta ku baxday daryeelka ay bixisay, GHS waxay bukaanka ama damaanad qaadaha siin doontaa ogeysiis qoran oo muujiya in dadka xaq u yeesha ay heli karaan kaalmada maaliyadda, sida qofka u dalbado kaalmada maaliyadda, iyo meesha laga heli karo Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy). Ogeysiiskaas qoran wuxuu aqoonsan doonaa ECAYada ay GHS ama dhinac kale oo la soo ogolaaday ku talo jirto in ay bilowdo in ay hesho lacagta ku baxday daryeelka iyo tilmaanto waqtiga ugu dambeeyo ee ECAYada la bilaabi doono. Taariikhda ugu dambeyso kama soo hormari doonto soddon (30) maalin kaddib taariikhda marka ogeysiis qoran la siiyo bukaanka ama damaanad qaadaha bukaanka. Luqadda Fudud Soo Koobidda Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Policy) waxaa la soo raacin doonaa ogeysiiska in GHS si macquul ah ugu dadaali doonto in ay afk ka ogeysiiso qofka Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (GHS Financial Assistance Policy) iyo sida uu bukaanka kaalmo uga heli karo Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy).

Waxaa soo socdo liiska ECAYada GHS la xariiri karto si ay u hesho lacag bixinta daryeelka la siiyay: (i) madluumaad loo diro wakaaladaha ka warbixiya deynta, (ii) dabagalka go'aanada sharciga, (iv) gudbinta dacwadaha qaanta lagu leeyahay hantida, (iv) ka goosashada mushaarka si soo aruuriyo baaqiga lagu leeyahay.

Wakaaladaha Aruurinta Deynta: Wakaaladaha aruurinta waxaa loo adeegsan baaqiga bukaanka iska bixiyo. Ma aha in xisaabaadka lagu dhaafi doono wakaaladda aruurinta muddada 120ka maalin kaddib marka la soo saaro bayaanka kowaad ee ka dambeeyo sii deynta, haddii bukaanka ama damaanad qaadaha bukaanka uusan u hoggaansamin qorshe lacag bixin oo lagu heshiyay.

Ka hor inta aan lagu wareejinin wakaaladda ka soo aruurinta dibadda, waxaa la fiirin doonaa xisaab kasta si loo habsado in GHS sameysay dadaal macquul ah si loo ogaado haddii bukaanka ama damaanad qaadaha bukaanka uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Fiirintaan kaddib, waxaa dhici karto in xisaabta loo gudbiyo wakaalad soo aaruurisa oo dibadda ka ah. Xisaab kasta iyo dhamaan xisabaadka lagu wareejiyo wakaaladda soo aruurinta waxay u hoggaansami doonaan sharuudaha kaalmada maaliyadda.

GHS ma ogola luqadda kadeedka, xumaanta, gumeysiga, beenta, khayaanada, ama marin habaabintan ama aruurinta ay fulliyaan shaqaalaha, qareenada aruuriya deynta, wakaaladaha, ama wakiiladooda iyo shaqaalaha.

Dhamaan wakaaladaha aruurinta ee u shaqeyso GHS waxay haysan doonaan heshiis qoran oo caddeyn doono in habka ay u soo aruuriyaan waa in uu waafaqsan yahay siyaasadaha GHS iyo waa in ay u hoggaansamaan sharciyada gobolka iyo federaalka ee lagu dabaqi karo. Ugu yaraan, heshiiska noocan waa in laga helo waxa soo socdo:

1. Haddii qofka soo gudbiyo Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy), tixraacinta kaddib ama marka la iibiyo deynta kaddib balse ka hor inta aan la gaarin dhamaadka muddada lagu dabaqo, dhinaca waxay hakad gelin doontaa ECAYada si ay u hesho lacag bixinta daryeelka.
2. Haddii qofka uu soo gudbiyo arjiga Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy) kaddib marka la fulliyo wareejinta ama iibinta deynta balse ka hor inta aan la gaarin dhamaadka muddada arjiga kaddibna la ogaado in uu xaq u leeyahay daryeelka hoos yimaada Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy), dhinaca waxay samayn doontaa waxa soo socda iyo waqtiga loo baahan yahay in la sameeyo.
3. Raac hababka ku qoran heshiiska ee hubiya in qofka uusan lacag bixinin, iyo in aysan waajib ku ahayn in uu bixiyo, dhinaca iyo hay'adda isbitaalka oo wada jira in ka badan isaga iyo iyada waxaa laga rabaa in ay bixiyaan daryeelka sida qof xaq u yeesha Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Policy).
4. Haddii lagu dabaqi karo iyo haddii xisbiga (bedelkii hay'adda isbitaalka), ay leedahay awood ay sidaan ku samayso, qaado dhamaan talaabadaha macquulka ah ay gadaal u celiso ECA kasta (marka laga reebo iibinta deynta ama ECA kale) oo laga qaado qofka.
5. Haddii dhinac uu deynta ku wareejiyo dhinac kale muddada arjiga, dhinaca waxay heshis qoran ka qaadan doontaa dhinaca kale kana mid ah dhamaan xubnaha lagu sharaxay baragraafkaan (c) (10).

Wakaalad kasta oo ka shaqeyso aruurinta lana shaqeyso xisabaadka GHS qofka iska bixiyo si loo habsado u hoggaansamida siyaasadaha, waxaa la siin doonaa koobiga Siyaasadaha Biilasha Qofka Iska Bixiyo ee GHS iyo Siyaasadaha Kaalmada Maaliyadda (GHS Self-Pay Billing and Collection and Financial Assistance Policies). Aqoonsi saxiixan oo laga sameeyo siyaasadda kaalmada maaliyadda iyo heshiis in daacad laga ahaado si loogu hoggaansamo siyaasadaha ayaa GHS gelin doontaa faylka.

Haddii bukaanka, ama damaanad qaadaha bukaanka, soo dalbado kaalmada maaliyadda, hadba kii dambeeyo, 240 maalin, laga bilaabo bayaanka kowaad kaddib marka laga saaro isbitaalka ama 30 maalin kaddib marka loo diro ogeysiiska talaabada aruurinta ee la rabo in la bilaabo, waa la ogolaan doonaa arjiga, kaddibna waxaa la joojin doonaa aruurinta inta go'aan laga gaarayo xaq u yeelashada. Haddii arjiilaha loo soo ogolaado in la siiyo daryeel lacag la'aan ah, lama qaadi doono talaabo kale oo kharashka looga soo aruuriyo xisaabta. Haddii arjiilaha loo ogolaado daryeel la dhimay, ama loo diido kaalmada maaliyadda, bukaanka ama damaanad qaadaha waa in qaado talaabadaha ku habboon si loo xalliyo baaqiga haray uu qofka bixiyoama ama waxaa la qaadi doonaa talaabo dheeraad ah oo lagu soo aruuriyo.

Ka Warbixinta Deynta: GHS waxay ogolaasho siisaa wakaaladaheeda aruurinta lacagta in ay xisabaadka bukaanka u gudbiyaan wakaaladaha soo diyaariya deynta macaamilka.

Kiisaska qaar, waxaa dhici karto in GHS adeegsato talaabo sharci, ama in wakaaladaheeda soo aruurinta ay bukaanka ka soo aruuriyaanbaaqiga ku haray bukaanka. Lama ogola in kooxo ka tirsan wakaaladaha aruurinta in ay talaabo ka qaadaan bukaan ama damaanad qaadaha bukaanka, ama raadcsadaan xukun ilaa laga gaaro 120-maalin kaddib muddada arjiga ka dhamaato lana rabo in GHS samayso dadaal macquul ah si loo ogaado in bukaanka uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda. Haddii la soo saaro go'aan ku saleysan sharciga, waxaa la adeegsan karaa talaabadaha soo socdo; in mushaarka deynta, in qaan la saaro hantida, iyo in qaan la saaro magta laga qaato ceymiska la xariira kharashka ku baxa adeegyada ay bixiso GHS aan weli la siinin.

Waxaa lala tashan doonaa GHS ka hor inta lagu dhaqaaqin talaabo sharci. Dhamaan xisaabaadka waxaa loo firin doonaa hadba sida kiiska yahay, waxana la tixgelin doonaa xaaladda bukaanka ama damaanad qaadaha bukaanka. Maamulka

GHS waxay fiirin doonaan dhamaan hawlaha aruurinta munaasabka ah si loo bubsado in dhmaan iskudayidda aruurinta iskaa wax u qabdo la fulliyay, iyo in xisaabta buuxisay sharuudaha mudanka.

Sheegashada Hantida Ma Guuraanka Bukaanka Dhintay kana Dambaynin Xaas Nool: Waxaa dhici karto in GHS ay qaan saarto hantida bukaanka dhintay haddii aysan jirin qof ka haray labada qof isqabta.

Xaaska ka soo hartay bukaanka dhintay, ee qaba biilasha GHS ee weli laga rabo, waxaa loo haystaa in ay mas'uul ka tahay bixinta kharashka waajibaadkaas, hase ahaatee GHS aysan helin.

TABABARKA SHAQAALAHA

Tababarka shaqaalaha waxaa la siin doonaa shaqaalaha ku hawlan isdhexgalka aruurinta. Shaqaalaha mas'uulka ka ah aruurinta xisabaadka uu qofka iskiisa u bixiyo waxaa la siin doonaa tababar oo ku saabsan adeegga macaamilka, waanwaanta/xallinta iyo xirfadaha aruurinta. Tababarka wuxuu xoogga saari doonaa Kaalmada Maaliyadda GHS (GHS Financial Assistance) iyo siyaasadaha Biilasha/Arruurinta (Billing/Collection policies) iyo ballan qaadka in dhamaan bukaanka loola dhaqmo naxariis iyo in la ilaaliyo sharafta. Tababarka wuxuu fiirin doonaa qoraalada aruurinta iyo macluumaadka kale ee loo baahan yahay in si dhab ah loo ogeysiyo bukaanka siyaasadaha GHS.

KORMEERIDA WAKAALADAH A ARUURINTA

Si joogto ah ayaa lool kormeeri doonaa wakaaladaha aruurinta ee ka soo jeeda dhinac saddaxaad una shaqeeya GHS si loo hubsado in ay u hoggaansamaan siyaasaddaan.

SIDA DADWEYNAHA U HELAAN SIYAASADDA

Macluumaadka ku saabsan Siyaasadda Kaalmada Maaliyadda (GHS Financial Assistance Policy), iyo Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Soo Aruurinta (GHS Self-pay Billing and Collection Policy) waxaa la siin doonaa bukaanka iyo bulshada ay GHS u adeegto iyadoo adeegsaneysa ilo kala duwan. Fadlan fiiri Qeybta Dambe 1 si aad u heshid tafasiil dheeraad ah.

HIRGELINTA

Talaabo kasta oo xumaan ah, kadeedda, luqad marrin habaabin ama dabeecadda aruurinta ee shaqaalaha GHS, shaqaalaha wakaaladda aruurinta deynta ama qareenada waxaa wax looga qaban doonaa hababka wax ka qabashada sixidda.

QARSOODIGA

GHS waxay badbaadin doontaa qarsoodiga bukaan kasta sida macluumaadka maaliyadda iyo wax ka qabashada macluumaadka caafimaadka qofka.

OGOLAASHADA SIYAASADDA

Siyaasadda kaalmada maaliyadda waxaa la siiyay iyo soo ogolaaday Guddiga Maaliyadda Maamulka GHS (GHS Governance Finance Committee) 03/12/2024. Siyaasaddaan waa la fiirin doonaa muddo ka muddo. Isbaddal kasta oo la taaban karo laguna sameeyo siyaasadda waa in ogolaasho laga helo Guddiga Dawladnimada GHS (GHS Governance Board).